Botulism

Somali



# Botulism

## Waa maxay botulism?

Botulism waxa weye cudur halis ah, waxaana suurowda in uu cudur dilaa ah oo ay keento nooc ka mid ah sunta. Sunta loo yaqaano – botulinum toxin – waxa soo saara bakteeriya. Sunta botulinum toxin waxa weye sunta ugu xooga badan ee lagu yaqaano cilmiga.



***Cuntada qasacaysan ee-guriga lagu sameeyey oo taabatay waxa la xiriira bakteeriyada cudurka botulism***

Botulism mar kasta waxa loo tixgeliya xaaladda deg-dega ee caafimaadka. Waxa uu dhalin kara dhimasho ku timaada curyaanimo muruqyada dadka u isticmaala neefsashada. Hase yeeshee, in ka badan 50 sanadood ka hor, daryeelka wanaagsan, heerka dhimashada dadka heleen botulism waxay boqolkiiba 50 hoos ugu dhacday boqolkiiba sideed.

Isku-geyn, ilaa 110 xaaladood ee ku saabsan botulism ayaa loo soo wargeliya Maraykanka (U.S.) sadnad kasta.

## Sidee buu kuugu dhacay botulism?

Sida caadiga ah, dadka waxay u qaadi karaan botulism saddex siyaabood oo kala duwan:

- cunida cunto sunta gaartay
- sunta ka dhalata meesha dhaawacan ee la xiriira bakteeriyada
- marka cunug uu cuno ama uu cabo wax ka kooban isboorayaasha bakteeriyada – qolofta adag ayaa bakteeriyada samaynaysa taa soo oo awood u lahayn in uu koro ama uu tarmo.

Waxa kale oo la rumaysan yahay in sunta botulism loo isticmaali karo hub ahaan – ayada oo si ula-kac ah loogu rido cuntada, ama lagu sii daayo hawada, sidaa darteedna dadku ay ku neefsadaan.

## Waa maxay calaamooyinka lagu garto?

Calaamooyinka botulism waa isku mid, ayadoon la tixgelinayn sida dadka ugu dhaco cudurka. Waxa ku jiraan araga oo laban laaba, araga oo aan si fiican u muuqan, hoos u liicida isha-baalkeeda, ku hadlid hadal aan la fahmaynin, wax liqida oo dhib noqota, afka oo qalala, iyo tabar dari ku timaado muruqa. Ilmaha marka la dhalay ee qaba cudurka botulism waxa ka muuqanaya tabar dari aad u daran, cunto qaadasho xun, caloosha (saxarada) oo adkaato, iyo oohin daciif ah iyo muruq la'aan. Kuwani dhamaan waa calaamooyinka dhimashada muruqyada neesashada oo qaaday sunta. Daweyn la'aanta, dadka qaada botulism waxa laga yaaba in ay ka curyaamaan gacmaha, lugaha, xididka iyo muruqyada loo isticmaalo neefsashada.

Marka botulism uu ku taabto cuntada, calaamooyinka sida caadada ah waxay soo muuqanayaan 18 ilaa 36 saacadood gudahooda. Hase yeeshee, waxay bilaaban karaan sida ugu dhaqsaha ee lix saacadood ka dib – ama ugu dheeraan 10 maalmood ka dib.

## Ma laga qaadi kara botulism dad kale?

Maya. Mar kale, botulism waxa weye nooc ka mid ah sunta. Ma sababayo wax noole ah, qofna uma gudbin karo qofka kale.

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH

Communications Office
625 North Robert Street
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
(651) 201-4989
www.health.state.mn.us

# Botulism – Pog 2

## Ma la daweyn kara botulism?

Daryeelka taageeridda xoog-saaridda deg-dega ee isbitaalka waxa weye daweynta ugu horaysa ee dhamaan qaababka cudurka botulism. Intaasi waxa ka mid noqon karaan qiyaasid la habeeyey si lagu caawiyo neefsashada ruuxa bukaanka ah. Haddii cudurka si dhaqso leh loo ogaado.  Daawooyinka waxa loo helaya si ay u joojiyaan dhibaatooyinka sunta – laakiin dawooyinkaas ma loo isticmaali karo ilmaha markaas dhasheen. Tallaabooyin ayaa laga qaadi kara cuntada ku jirta neef-shiidka qofka bukaanka ah. Marka dadka botulism ay ka qadaan meel dhaawac ah, meesha sunta ka soo baxayso qalliin ayaa loogu qaadi kara.

Xaaladaha daran, daweynta botulism waxay qaadan karta isbuucyo, ama xata bilo. Marka cudurka kugu dhaco-ka dib-kaa soo uu ku jiro karo daal badan iyo neefsashada oo kugu yaraato – waxay gaari karta sanooyin.

## Ma laga hortagi kara botulism?

Waxa tallaal ah oo la heli karo ma jiro si bulshada guud loogu badbaadiyo botulism. Tallaal tijaab ah ayaa mar-mar lagu isticmaala si loo badbaadiyo shaqaalaha shaybaarka iyo shaqaalaha ciidanka meliteriga. Cunto-la xiriirta botulism waa laga hortagi kara ayada si taxadar leh cuntada-loogu isticmaalayo – guriga-cuntada qasacaysan si gaar ayaa loo tixgelinaya. Ilmaha markaas la dhalay ee ka yar 12 bilood waa in aan la quudsiin malab, kaa soo wata isboorayaasha (spore) bakteeriyada botulism.

## Maxa loogu tixgelinaya botulism suuragalka hubka argagaxa?

Sunta uu soo saaro bakteeriyada botulism waxa weye sun aad u xoog badan oo aad u saraysa. Sunta waxa kale oo weye mid si fudud loo soo saari karo gaadiidna lagu qaadi karo. Dadka soo saara botulism waxay u baahana yihiin badbaadin muddo dheer, daryeel xaaladiisa gaar ah. Cudurka botulism oo si weyn u dilaaca wuxuu dhalin kara carqalad weyn oo ku timaada hawlaha caadiga ah.

Isku dayga loomisticmaalay botulism hub ahaan dib ugu laabo Dagaalka Aduunka II. Laga soo bilaabo 1970, tiro wadamo ah ayaa soo saareen – ama la rumaysan yahay in ay soo saarayaan – awooda lagu isticmaalayo botulism hub ahaan. Urur diimeed oo Jabaanees ah wuxuu isku dayey in uu hawada ku sii dayo sunta botulism meelo kala duwan ee nawaaxiga Tookiyo, ugu yaraan saddex jeer, oo u dhaxaysay 1990 iyo 1995.

## Maxa aan samaynaya haddii aan u maleeyo in aan qaaday botulism?

Haddii aad la kulantid wax calaamooyin ah oo botulism ah, waxa aad aragta dhakhtarkaaga si ugu dhaqsaha badan. La xiriir hay’adda fulinta sharciga xaafaddaada haddii aad aragtid wax xaalado ah oo kaa shakiya ama hawlo ku tacluuqa isticmaalka botulism ee xaafaddaada – ama wax kasta oo nafleey ah – oo loo adeeganayo hub ahaan.